

# Forward Looking Infrared Real-time Video (FLIR)

Seattle Police Department (SPD, Waaxda Booliiska ee Seattle)

## Waa maxay tiknoolajiyadu?

Laba ka mid ah Diyaaraha Qumaatiga u kaca ee King County Sheriff's Office (Xafiiska Ciidanka Nabadgelyada ee Degmada King) oo leh Forward Looking Infrared (FLIR, Kaamirooyinka Nalka wata ee Wax duuba) ayaa warbixinta muuqaalka ah oo xiligeeda soo baxda ka duuba waxyaabaha socda una dira hoggaanka ciidanka ee dhulka jooga.

Tignoolajiyadaan waxay bixisaa naqshad ku aadan sawirka dusha sare laga duubo iyo muuqaal casri ah oo meelo badan oo banaan la duubaayo (tusaale, goobaha fal danbiyeedku ka dhacaan iyo waxyeelada masiibada, iwm.)

## Maxaan u adeegsanaa qalabka tiknoolajiyada?

Diyaaraha qumaatiga u kaca ee Guardian One iyo Guardian Two ayaa caawimaad muhiim ah siiya ciidanka SPD ee dhulka jooga marka dhacdooyin dhacaan. Gunnooyinka waxaa ku jira jawaab celin degdeg ah oo laga baxsho goobaha danbiyada ama masiibadu ka dhacdo iyo in ciidanka booliiska la siiyo muuqaalka guud ee xaalada.

### Aruurinta

Tignooloojiyada Kaamirada Nalka Leh ee Muuqaalka duubta (FLIR) oo ku xiran diyaaraha qumaatiga u kaca ayaa sawir qeexan ka qaada goobaha shilalka ayadoo bixinaysa saxiixyada kuleelka ee shaqsiyaadka iyo walxaha oo lagu duubaayo muuqaal dusha sare ah. Tignooloojiyada FLIR waxay sahlayaa in waxyaabaha lagu arko kaamirada xataa marka daruur, boor, ama mugdi ay ku qarsoomaan.

### Isticmaalka

Diyaaradaha qumaatiga u kaca iyo Tignooloojiyada FLIR ee ku xiran waxay kaliya ka jawaabaan dhacdooyinka degdega ah ee SPD-ga kuwaas oo u baahan caawimaad dhanka hawada ah loona codsado, ayna ku jiraan weerarka, jabsiga, iyo dhaca.

### Ilaalinta

SPD waxay kaliya helayaan ayna galayaan xogta kasoo baxda muuqaalka kaamirada kaasoo quseeya dhacdooyinka diyaaraha Guardian One iyo Guardian Two ay soo duubaan. Xogta loo diro aaladahaan ma ay heli karto cid ka baxsan waaxahaan.



Muddada ladhiiban karo fikradaha laxiriira aaladahaan casriga ah ayaa hadda socda. Waxaad fikradahaaga kusoo diri kartaa [Seattle.gov/Surveillance](https://www.seattle.gov/surveillance).

Dhammaan fikradaha ladhiibto waxaa lagusoo darayaa Warbixinta ugu danbaysa ee Saamaynta Qalabka Muraaqabada ee aaladaan kaasoo loo diro Dawlada Hoose.

Haddii aad doonayso inaad fikir kadhiibato xili kabaxsan mudada fikradaha loo qabtay, fadlan si toos ah ugu dir Dawlada Hoose ee Magaalada.



City of Seattle

# Nidaamyada Duubista Muuqaalka

Seattle Police Department (SPD, Waaxda Booliiska ee Seattle)

## Waa maxay tiknoolajiyadu?

SPD waxay leedahay laba nidaam oo kuwa kaamirada ku shaqeeya ah loo duubo iyo/ama loola socdo xubnaha bulshada ee ku jira foobaha gaarka ah, ammaanka ah ee SPD.

Nidaamyadaan waxay duubaan dhacdooyinka ka dhaca Qolka Blood Alcohol Collection (BAC, Aruurinta Khamrada Dhiiga), qolalka lagusii hayo dadka lasoo xiro, waraysiyada, iyo qolalka dadka lagu baaro.



## Maxaan u adeegsanaa qalabka tiknoolajiyada?

Abuurista diiwaanka muuqaalka ah ee dhacdooyinka ka dhex dhaca qolalka BAC iyo qolalka xabsiga ayaa baxsha cabirka isla xisaabtanka ee SPD iyo xubnaha bulshada ee ku lugta leh. Duubista muuqaalka iyo codka ah ee dhibanaha, marqaatiga, iyo waraysiyada eedaysanaha ayaa gacan ka gaysta baaritaannada iyo oogista dacwadaha danbiyada iyo sidoo kale kor u qaadista kalsoonida dadwaynuhu ku qabaan farsamooyinka SPD.

Muddada ladhiiban karo fikradaha laxiriira aaladahaan casriga ah ayaa hadda socda. Waxaad fikradahaaga kusoo diri kartaa [Seattle.gov/Surveillance](http://Seattle.gov/Surveillance).

Dhammaan fikradaha ladhiibto waxaa lagusoo darayaa Warbixinta ugu danbaysa ee Saamaynta Qalabka Muraaqabada ee aaladaan kaasoo loo diro Dawlada Hoose.

Haddii aad doonayso inaad fikir kadhiibato xili kabaxsan mudada fikradaha loo qabtay, fadlan si toos ah ugu dir Dawlada Hoose ee Magaalada.

### Aruurinta

Tignooloojiyadahaan waxay duubaan kaliya muuqaalada iyo codadka dhaca inta lagu jiro waraysiga SPD ee waraysiga marqaatiga, dhibanaha, ama eedaysanaha, iyo shaqada qolalka BAC ee maxaabiista lagu hayo.

### Isticmaalka

Muuqaalka kaliya ee aan codka lahayn ayaa loo adeegsadaa la socoshada qolalka waraysiga ayadoo uusan joogin xubin ka tirsan danbi baarayaasha SPD. Nidaamkaan waxaa sidoo kale loo adeegsadaa abuurista waraysiyada muuqaalka ah si loogu adeegsado dacwadaha fal danbiyeedyada.

### Ilaalinta

Boor ayaa lagu dhajiyaa meel loo jeedo dhammaan xarumaha SPD ayadoo la sheegayaa in duubista cod ama muuqaal uu socdo. Calaamadahaan waxaa lagusoo dhajiyaa labadaba albaabada hore illaa qolalka dadka lagu xiro iyo meelaha gudahooda la duubo.

Habraaca caadiga ah ayaa amraaya mawduucyada waraysigu mar kasta noqdaan kuwo wata muuqaal ama laga codsado oggolaanshahooda intaan la duubin.

# Kaamirooyinka Digniinta Xaalada ee aan Wax Duubayn

Seattle Police Department (SPD, Waaxda Booliiska ee Seattle)

## Waa maxay tiknoolajiyadu?

Kaamirooyin la qaadi karo oo u sahlaaya saraakiisha inay la socdaan darafyada geedaha ama meelaha kale inta lagu jiro hawlgalka gaarka ah ee ay saraakiishu u baahan yihiin inay arkaan xaalada kahor intaysan gelin meesha ciladu ka jirto. Kaamirooyinka ayaa hoos loogu dhigi karaa ama lagu tuuri karaa goobta ayagoo lagu xiraaayo xarig dabada la qabanaayo laguna fidin karo daafaha ama aaga. Kaamirooyinka waxaa ku xiran aaladaha wireless-ka ku shaqeeya oo u diraaya saraakiisha ciidanka sawiro.

## Maxaanuadeegsanaa qalabka tiknoolajiyada?

Ciidanka taatikada ee SPD ayaa adeegsada kaamirooyinka digniinta inay qiimeeyaan xaaladaha jawi ahaan khatarta ah ayagoo ka fog barta khatarta. Adeegsiga kaamirooyinka waxay u sahlayaa SPD inay aragto meelaha u dhaw aaga dhacdada ayna xog dheeraad ah helaan kahor gelitaanka goobta, ayagoo siinaaya badqab iyo ammaan dheeraad ah ciidanka SPD, dhacdada la baaraayo, iyo xubnaha kale ee bulshada.

### Aruurinta

Waxaa jiro 4 nooc oo kaamirooyinka digniinta xaalada ee ay adeegsadaan Ciidanka SPD's SWAT:


- Kaamirooyinka Ku xiran Aaladaha Roobaatka
- Kaamirooyinka Wax laga arko
- Kaamirooyin meel La saari karo
- Kaamirooyinka la Tuuri karo

### Isticmaalka

Kaliya xubnaha SWAT ka ayaa loo oggol yahay inay adeegsadaan qalabka waxaana si gaar ah loogu tababaray adeegsigooda. Hogaamiyaasha SWAT ayaa diyaar u ah xaqiijinta isticmaalka saxda ah ee tignooloojiyada.

### Ilaalinta

Ma jiraan sawiro ama xog lasoo aruurshay, la kaydshay, ama lagu aruurshay kaamirada digniinta xaalada ee ay adeegsadaan SPD. Kuwaan waxaa ku jira kaamirooyinka qudhooda iyo qalab kasta oo xog gudbinaaya. Dhammaan xubnaha SWAT waxaa la siiyaa tababar ku aadan adeegsiga iyo isticmaalka saxda ah ee kaamirooyinka.



Muddada ladhiiban karo fikradaha laxiriira aaladaha casriga ah ayaa hadda socda. Waxaad fikradahaaga kusoo diri kartaa [Seattle.gov/Surveillance](https://Seattle.gov/Surveillance).

Dhammaan fikradaha ladhiibto waxaa lagusoo darayaa Warbixinta ugu danbaysa ee Saamaynta Qalabka Muraaqabada ee aaladaan kaasoo loo diro Dawlada Hoose.

Haddii aad doonayso inaad fikir kadhiibato xili kabaxsan mudada fikradaha loo qabtay, fadlan si toos ah ugu dir Dawlada Hoose ee Magaalada.